# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1049 1:6-2:1-3

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay kitaabkii Caamoos oo ahaa nin Ilaah farriin ugu soo dhiibay boqortooyadii woqooyi xilli ay ku baraareen hawlahooda, laakiin haddana ay Ilaah ka dheeraadeen.

Caamoos ma ahayn nin la mid ah culimadii waxbaratay ee wakhtigiisa, wuxuuse ahaa nin uu ka dhex shaqaynayo Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah. Mar uu la hadlayey dalladda kulmisa culimadii waxbaratay ee reer binu Israa'iil, laakiinse haddana Ilaah ku xad-gudubtay, ayuu nebigu leeyahay, sida ku qoran isla kitaabkii Caamoos 7:15, waxaana qoran sidatan: **"Markaasaa Caamoos jawaabay oo wuxuu Amasyaah ku**

**yidhi, Anigu nebi ma aan ahayn, nebi wiilkiisna ma aan ahayn, laakiinse waxaan ahaan jiray adhijir iyo mid midhaha darayga urursada, oo Rabbigu waa ii soo yeedhay anigoo adhi jiraya, markaasuu Rabbigu igu yidhi, Tag, oo dadkayga Israa'iil wax u sii sheeg."**

**SONG: REEL----CUT-------**

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay aayaddii 5aad ee cutubka kowaad ee kitaabkii Caamos. Waxaana nebigu uu ku bilaabay waxyiyada inuu wax ka sii sheego reer Suuriya, waxaana eeddii lagu soo oogay ay ahayd sidii xumayd ee ay ula dhaqmeen reer binu Israa'iil.

Waxaana Ilaah ku yiri;

**"Qataarkii albaabka Dimishaq waan jebin doonaa, oo waxaan dooxada Aawen ka wada baabi'in doonaa dadka deggan, oo weliba kan haysta usha boqornimada ayaan reer Ceeden ka gooyn doonaa, oo dadka suuriyana maxaabiisahaan baa loogu kaxaysan doonaa Qiir."**

Mar kasta oo aad akhrinayso kitaabka way ahmiyad ballaaran tahay inaad maanka ku hayso inaad akhrinayso qiso dhab ah. Waa Hadallada Ilaah waa saxiix oo xitaa markii kitaabku ka hadlayo samada wuxuu ka hadlayaa waxyaabo dhab ah. Balse dhegaystayaal haddaynu intaas ku dhaafno xukunkii dusha looga tuuray reer Suuriya, ayaannu imminkana u guda-gelaynaa maaddada kale ee ah:

## Xukunkii reer Falastiin la saaray
## Markii ay israa'iil maxaabiis ka dhigeen

Bal si markaa aynu wax kaga ogaanno ciqaabta reer Falastiin ayaannu imminka la soo kala baxaynaa baalka 1043 ee Axdigii Hore, kitaabkii Caamoos 1:6-8, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Rabbigu wuxuu leeyahay, Saddex amase afar xadgudub oo ay reer Gaasa sameeyeen aawadood ayaanan ciqaabtooda uga noqonaynin, maxaa yeelay, iyagu dadkii oo dhan ayay maxaabiisahaan u kaxaysteen si ay ugu gacan geliyaan reer Edom. Laakiinse dab baan ku soo dayn doonaa derbiga Gaasa, oo wuxuu laasan doonaa daaraheeda waaweyn."**
**"Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxaan Ashdood ka wada baabi'in doonaa dadka deggan, oo welbia kan haysta usha boqornimada ayaan reer Ashqeloon ka gooyn dooaa, oo waxaan gacantayda ku soo jeedin doonaa reer Ceqroon, oo kuwa reer Falastiin ka hadhayna way wada baabi'i doonaan."**
Haddaba marka Ilaah leeyahay, **"Saddex iyo Afar xad-gudub"** ayaa taasu ka macne tahay dhowr xad-gudub oo ay sameeyeen dadka reer Gaasa ama kuwa xukunka ku dhacayo sidaanno horeyba idiinku soo dheegnay. Waxaana buux-dhaafay xad-gudubyadooda. Gaasa waxay ku taallaa dhulka Falastiin, waxaana la oran jiray boqortooyadii reer Falastiin. Ciqaabta waxaa u keenay iyaga inay dadkii u iibiyeen waa reer binu Israa'iil e, addoonnimo.
Waxay ka iibinayeen masaakiintii reer binu Israa'iil reer Edom iyo reer Foyniike. Reer Foyniikena waxay ahaaneen qoomiyad ku horraysa baayac-mushtariga. Markii reer binu Israa'iil oo reer Falastiin ay ku qabsadeen dagaal, laga iibiyo iyaga, waxay iyaguna ka sii iibin jireen qoomiyadihii degganaa Mediterraneanka. Sababtaas aawadeed ayaa Ilaah wuxuu ku leeyahay, waxaan ciqaab dusha ka saarayaa reer Falastiin.
Waa wax xiisa leh haddaba in waxa imminka loo

yaqaanno Jiidda qasa aanay joogin reer Falastiin. Waxaa dhulkaas ku nool dad carab ah, waxaana maamula Israa'iil. Waxaase imminka ka aloosan xiisado u dhexeeya Carabta iyo Israa'iil.

Habase yeeshee Ashdood iyo Ashqeloon waxay ku dhex yaallaan Israa'iil, oo waa magaalooyin waaweyn, Ashdood waxaa ku yaalla warshadda sifaysa saliidda qayriin, waxaana halkaas laga dhisay dakad weyn, oo waxay noqotay imminka marso ay maraakiibta dalka Israa'iil yimaadaa ay ku soo xidhaan oo ka weyn kana ahmiyad ballaaran Haifa, oo iyada qudheedaba ah magaalo dakad leh. Ahsqeloon ayaa iyaduna waxay ku taallaa koofurta Ashdood. Waxaana halkaas weli ku yaalla burburkii macbudkii Daagoon, waana magaaladii uu joogi jiray xaakinkii xoogga weynaa ee la oran jiray Samson sida ku qoran isla kitaabka Xaakinnada cutuka 16aad. Markaa meelaha aynu ka hadlaynaa waa meelo jirijiray, oo aan ahayn wax layska been abuurtay. Sababtaas aawadeed ayaa waxyaalaha kitaabku ina barayo oo dhan waa kitaabkan Qoduuska ah ee Baybalka e, ay u yihiin saxiix. Marka nebigu leeyahay, waxaan dab ku soo deyn doonaa derbiyada magaalada Gaza ayaa taasu sida la rumaysan yahay la soo kaamilay.

Waxaa ku qoran kitaabkii labaad ee Boqorrada 18:8, baalka 497 ee Axdigii Hore sidatan:

**"Oo reer Falastiinna wuxuu ku laayay Gaasa iyo soohdimaheeda, iyo tan iyo munaaraddii waardiyayaasha iyo ilaa magaaladii deryka lahayd."**

Weliba qorniinku intaas ugama bixin, laakiin wuxuu ka sii faaloonayaa sidii Xisqiyaah magaalada meelaheedii ugu muhiimsanaa uu u gubay.

Markaa iyada ahna waxaa la kaamilay waxyigii nebi Caamoos cilmiyan. Waxaanay adkaynaysaa sida Ilaah mar waliba waxyiyadiisa ku qoran kitaabka u soo kaamilo iyo in weliba uu soo kaamili doono waxyiyada aan weli la soo kaamilin, sida imaanshaha labaad ee Sayid Ciise Masiix. Haddaan markaa intaa uga baxno ciqaabtiir eer Falastiin, ayaannu imminkanna isla eegaynaa maaddada kale ee ah:

**Ciqaabtii reer Foyniike markii ay jabiyeen cahdigii ay la dhigteen Israa'iil**

Haddaba waxaannu imminka soo gaarnay ciqaabtii reer Foyniike, oo aan ku eedaysnayn oo keliya inay dadka iibinayeen, laakiin ku eedaysan inay cahdigii ay Israa'iil la lahaayeen jebiyeen. Ninka la yiraahdo Xiiraam, oo ahaa boqorkii reer Tuuros, ayaa wuxuu ahaa saaxiib uu leeyahay boqor Daa'uud.

Waxaanay heshiis ahaayeen reer binu Israa'iil wakhti dheer. Haddaba lama hayo qoraal sheegaya in reer binu Israa'iil ay weligood dagaal ku qaadeen reer Foyniike. Haatnase reer Foyniike waxay jebiyeen heshiiskii iyaga iyo reer binu Israa'iil ka dhexeeyey. Haddaan qorniinka idiinka akhrinno kitaabka Caamoos ayaannu imminka idiin akhriyeynaa 1:9, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Rabbigu wuxuu leeyahay, Saddex iyo weliba afar xadgudub oo ay reer Turus samaeeyeen aawadood ayaanan ciqaabtooda uga noqonaynin, maxaa yeelay, iyagu dadkii oo dhan ayay u gacan geliyeen reer Edom, oo soo mana ay xusuusan axdigii walaalnimada."**

Marka Ilaah leeyahay, **"Afar iyo saddex Xadgudub"** ayaa taasu ka macne tahay inaan lays-daba tixi karin dembiyadooda oo ay ka badan yihiin afar, shan, lix

ilaa toban xadgudub. Waxaa suuragal ah haddii la xisaabi lahaa dunuubtooda inay kor u dhaafi lahayd boqol, laakiin imminka wuxuu sheegayaa kuwa ugu daran ee soo dedejiyey ciqaabta. Wuxuuna Ilaah leeyahay:

**"Ilaa afar xadgudub oo ay reer Tuurus sameeyeen aawadood ayaanan ciqaabtooda uga noqonaynin, maxaa yeelay, iyagu dadkii oo dhan ayay u gacan geliyeen reer Edom, oo soomana ay xusuusan axdigii walaalnimada."**

Axdigiisu waa heshiis ay wada saxiixdeen reer Goyniike iyo reer binu Israa'iil. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 1aad, ayaannu imiinkana idiin akhriyeynaa aayadda 10, waxaana qoran sidatan:

**"Laakiinse dab baan ku soo dayn doonaa derbiga Turos, oo wuxuu wada laasan doonaa daaraheeda waaweyn."**

Waxaa reer Tuuros ku soo hor-maray reer Suuriya, inkstoo ay ku guuldarraysteen inay qabsadaan magaalada, laakiin belaayo ayey ku dhigeen reer Foyniikihii magaalooyinka waaweyn degganaa. Markii Nebukadnesar magaalooyinkii derbiyada lahaa qabsaday, ayaa haddana waxaa u suura-gashay reer Foyniike inay magaalooyin ka samaystaan xeebaha. Nebukadnesarna wuxuu burburiyey magaalooyinkoodii waaweynaa ee ka dhisnaa dhulka xeebaha ka fog. Laba boqol iyo konton sannadood kaddib Nebukadnesar, waxaa dhulkii yimid Alexanderkii Weynaa. Wuxuuna arkay in magaalada xeebta ku tiil ee reer Foyniike ay ahayd mid hodan ah, markaasoo burburiyey magaaladii, oo ka dhigay dhul bannaan. Waxaana taasu

kaamishay waxyigii Yexesqeel ee ahaa in magaalada Tuuros dhulka lala simi doono, oo lagu dari doono badda. Wuxuu soo dhammeeyey hodantinimadii reer Foyniike, waxaana taasu kaamilaysaa oo kale waxyigan nebi Caamoos cilmiyan. Balse imminka yanu horey uga soconno maaddadii horey ee khusaysay waxyiga reer Foyniike, waxaanan imminka eegaynaa:

## CIQAABTII LA SAARAY REER EDOM CADOWNIMADOODA DARTEED

Imminka waxaa ciqaab dusha laga saarayaa reer Edom oo iyagu ahaa niman arxan daran. Waxay ahaayeen niman aarsasho badan oo welibana aarsashada qofka aadmiga ah waxaa sal u ah cadowtinnimo ama xaasadnimo naftiisa ku jirta. Reer Edom waxay ka masayreen walaalahood reer Binu Israa'iil. Reer Edom waxay ka soo farcameen Ceesaw, reer binu Israa'iilna waxay ka soo farcameen Israa'iil ama nebi Yacquub. Waxaanan garanaynaa in Yacquub iyo Ceesaw ay walaalo ahaayeen.

Waxaanay ahaayeen laba wiil oo mataana ah oo u dhalatay Isxaaq, waa naebi Isxaaqe, oo ahaa ina Ibraahim. Haddaan meeriska cutubka kowaad ee kitaabkii Caamos horey idiinku sii wado ayaannu bal haatan qorniinka ka eegaynaa waxa reer Edom ku dhacay ka gadaal markii ay si arxan darro ah u laayeen walaalahood reer Binu Israa'iil.

Waxaanan waxyiga ka eegaynaa baalka 1043 ee Axdigii Hore, 1:11-12, waxaana qoran sidatan:

**"Rabbigu wuxuu leeyahay, saddex iyo weliba afar xadgudub oo ay reer Edom sameeyeen aawadood ayaanan ciqaabtooda uga noqonaynin, maxaa yeelay, iyagu walaalahood bay seef ku eryadeen, oo way iska**

**xooreen naxariis oo dhan, oo xanaaqoodiina had iyo goorba bay la qarxeen, oo cadho bay la gubanayeen weligoodba. Laakiinse dab baan ku soo dayn doonaa Teemaan, oo wuxuu wada laasan doonaa daaraha waaweyn oo Bosraah."**

Haddaba magaaladii ka dhisnayd qorarka ee Petra, oo ahayd magaalada madaxda reer Edom, oo ku tiillay dhulkii reer Teemaan, ayaa sida nebiguba leeyahay la baabi''iyey. Magaaladii Bosraah ayaa iyana la dudumiyey, oo aan imminka la garanaynin halkii ay ka dhisnayd. Waxaanay ka baxday qoraalka taariikhda wixii intaas ka dambeeyey.

Mar kale ayaa haddana la kaamilay waxyigii ku aaddanaa reer Edom cilmiyan. Waxaa ku soo kor degay ciqaab iyadoo ay ugu wacan tahay nacaybkii ay u qabeen walaalahood reer Binu Israa'iil. Haddaan intaas kaga gudubno waxyigii ciqaabta ahaa ee ku aaddanaa reer Edom, ayaannu imminkana uga gudbaynaa maaddada kale ee ah:

## Ciqaabtii reer Cammoon loo saaray argaggixii ay dadka ku rideen awgeed

Waxaa imminka ciqaabtu ay soo gaartay reer Cammoon, oo ahaa qarankii ka soo farcamay Luut. Markii khariidadda dhulka kuwa waxyigu ku socdo la eego, ayaa waxaa muuqanaya wareeg ama goobaabin waa sida waxyigu u socdo marka la eego qaramada ciqaabtu saaran tahay. Waxaannu ka soo bilownay reer Suuriya, oo waxaannu soo marnay reer Falasstiin, iyo reer Edom oo iyagu darafka koonfureed deggan, imminkana waxaa la marayaa reer Cammoon.

Maxaa haddaba keenay in reer Cammoon ciqaab la saaro. Reer Cammoon waxay galayeen dembiyo

argaggixisannimo. Haddaan meeriska cutubka kowaad horey idiinku sii wadno ayaannu imminkana idiin akhriyeynaa aayadda 13aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Rabbigu wuxu leeyahay, Saddex amase afar gadgudub oo ay reer Cammoon sameeyeen aawadood ayaanan ciqaabtooda uga noqonaynin, maxaa yeelay, iyagu waxay dooxeen naagihii uurka lahaa oo reer Gilecaad si ay xudduudkooda u ballaadhsanaad aawadeed."**

Waxay reer Cammoon degganaayeen daanka bari ee Webiga Jordan, waxaanay gaashaan-buur la ahaayeen reer Suuriya, iyagoo la dagaallamaya ugu dhowaan saddex qabiil oo reer binu Israa'iil ahaa, oo degganaa dhulkii Gelicaad. Waxaanay dembiyadaas u gelayeen inay xuduudaha ballaariyaan. Weli waxaannu ku jirnaa meeriska cutubka kowaad, waxaanan haatan idiin akhriyeynaa aayadaha 14-15, waxaana qoran sidatan:

**"Laakiinse dab baan ku soo dayn doonaa derbiga Rabbaah, oo wuxuu wada laasan doonaa daaraheeda waaweyn, oo maalinta dagaalka waa la qaylin doonaa, oo maalinta dabaysha cirwareenkana duufaan baa ku dhici doona. Rabbigu wuxu leeyahay, Boqorkooda maxaabiis ahaan baa loo kaxaysan doonaa isaga iyo amiirradiisaba."**

Ciqaabtii ay heleen reer Cammoon waa tan Ilaah leeyahay, "Laakiinse dab baan ku soo dayn doonaa derbiga Rabbaah, oo wuxuu wada laasan doonaa daaraheeda waaweyn." Rabbaah waxay ahayd magaalo weyn oo ay lahaayeen reer Cammoon. Beryihii dambe Giriigta ayaa waxay u bixiyeen magaaladaas Philadelphiadii reer Masar.

Waxaa waddankaas maanta loo yaqaannaa Cummaan, waana magaala madaxda Urdun. Waxaa halkaa weli daadsan burburkii magaalooyinkii hore ee lahaa xadaaradaha ilbaxnimo, kuwaasoo ciqaabta Ilaah saaray qoomiyadihii halkaas degganaa aawadood, la wada baabi'iyey. Magaalada Cummaan waxaa laga dul dhisay burburkii magaaladii reer Cammoon.

Haddii aad doonayso inaad aragto in waxyigii Rabbiga ee ahaa in magaalada la burburin doono la kaamilay iyo in kale, waxaad la soo kala baxdaa kitaabkii labaad ee boqorrada, waxaana akhrisaa 8:12-13. Xasuuqa ninkan Xasaa'eel ah uu saaray qoomiyadii uu ka xoogga weynaa, waa xasaa'eelkii reer Suuriya e, wuxuu ahaa mid weyn.

Nebi Elishaa ayaa wuxuu isaga ku yiri, **"Xasuuqa caynkaas oo kale ah qof caadi ahi ma geysan karo, laakiin Eeyaha ayaa sidaa oo kale wax u burbursada.**"

Haddaba in Xasaa'eel ahaa dabiicad ahaan sida eeyaha oo kale ayaan doodi ka taagnayn, wuxuu sameeeyey waxyaabo eeyaha oo kaleiya ay samayn kari lahaayeen. Waxaanan akhrinnay waxa reer Cammoon oo hoos joogay Xasaa'eel ay ku sameeyeen hooyooyinkii reer binu Israa'iil oo waxay ahaayeen umula doox, taasaana keentay ama soo dedejisay ciqaabtii la saaray.

MUSIC.

Waxaa intaas ku soo dhammaanaya haddaba dhegaystayaal ciqaabtii la saaray reer Moo'aab iyo weliba cutubkii kowaad. Waxaanan si dawaali ah idiinku bilaabaynaa haatan:

## CUTUBKII 2AAD EE KITAABKII CAAMOOS

Waxaan markaas ku bilaabaynaa kitaabka maaddada

khusaysa xukunkii la saaray reer Moo'aad iyadoo ay ugu wacan tahay caddaaladdarridooda. Haddaan caddaaladdarridii reer Moo'aab idiin akhrinno, ayaa waxaa qorniinku leeyahay sidatan ku qoran kitaabkii Caamoos 2:1, isla baalka 1043 ee Axdigii Hore, waxaana qoran sidatan:

**"Rabbigu wuxuu leeyahay, Saddex iyo weliba afar xadgudub oo ay reer Moo'aab sameeyeen aawadood ayaanan ciqaabtooda uga noqonaynin, maxaa yeelay, iyagu waxay gubeen lafihii boqorka reer Edom ilaa ay nuurad noqdeen."**

Waxaan haddaba anigu aaminsanahay in ninkan Caamoos ah uu yahay wacdiye weyn. Markii uu sharraxaad ka bixinayo dembiyada wuxuu leeyahay:

**"Saddex iyo afar xadgudub,"** waana sharraxaad isaga gaar u ah. Wuxuuna raacinayaa xadgudubka aawadii inaanu ka noqonaynin ciqaabtii uu saaray qoomiyaddaas la sheegay xad-gudubyadeeda. Reer Moo'aab waxay gubeen lafihii reer Edom, oo waxay ka dhigteen nuurad. Waxaana aarsashadoodii noqotay mid yaab leh. Haddaan horey idiinku sii wadno ayaannu eegaynaa baalka 1043 ee Axdigii Hore 2:2-3, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Laakiinse dab baan ku soo dayn doonaa dalka Moo'aab, oo wuxuu wada laasan doonaa daaraha waaweyn oo Qiryoot, oo reer Moo'aab waxay ku dhiman doonaan buuq iyo qaylo iyo buun dhawaaqiis. Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu xaakinka waan ka baabi'in doonaa dalka Moo'aab dhexdiisa, oo amiirradiisa oo dhanna waa la layn doonaa."**

Reer Moo'aab way u dhammaan doontaa, oo dalkoodana waxba ka hari maayaan. Waxaase la yaab leh in wakhti

ka horreeyey wakhtigaas ay jirtay haweenay la oran jiray Ruut oo qurux-badnayd, oo uu mehersaday nin reer binu Israa'iil ah, oo weliba reer Yahuudaha ahaa oo la oran jiray Bocas. Waxaana Ruut ka soo farcamay Sayid Ciise Masiix. Qabiilkaas wuxuu ahaa cawaan, waxaana ku dhacday masiibo, oo waxaa Ilaah soo af-jaray inay quruun sii ahaadaan.

Haddaba in falal arxan-darro ah lagu koco waxay soo dedejinaysaa ciqaab ku imanaysa xukuumadda. Qisada Ruut waxay tilmaan u tahay waxa Ilaah ka samayn karo nolosha rumaystaha iyadoo nimcada Ilaah lagu soo booqanayo qofka Ilaah aqbala ee muuminka ah. Ruut waxay ahayd qof muumin ah oo gartay in Ilaaha Israa'iil ooa haa kan uumay samada iyo dhulka, oo welibana ah Ilaaha neefta siiya wax waliba oo naf leh, uu ahaa Ilaah.

Waxay kaloo rumaysnayd in asnaamta ay dadkeeda caabudayeen aanay ilaah ahayn. Imminkana waxaa nebigu uu diiradda saarayaa reer Yahuudah, waxaanan isla eegaynaa maaddada ku taxluuqda:

## Ciqaabta reer Yahuudah la saaray markii ay fududaysteen sharcigii Ilaah

Wuxuu imminka nebigu soo dhexgelayaa inuu wax ka sii sheego reer binu Israa'iil, wuxuuna ku bilaabayaa imminka reer Yahuudah. Waa qaab ama marriin ka duwan sida nebiyada isaga ka dambeeyey lagu yaqaannay. Waxay ku bilaabi jireen ciqaabta reer binu Israa'iil ku soo fool leh, dabadeetana waxay ku xijin jireen tan quruumaha. Waxa ciqaabta loo saarayo Israa'iilna waa wax iska cad, waayo kuwa Rabbiga garanaya waxay leeyihiin masuuliyad ka badan tan saaran kuwa aan Ilaah garanaynin. Waxay ku dhex

jiraan kuwa Ilaah garanaya iftiinka Hadallada Ilaah, oo way ka garasho dheer yihiin dadka caadiga ah ee aan Ilaah garanaynin ee iyaga ku wareegsan. Habeenka xiga ayaannu barnaamijka halkii idiinka sii wadi doonnaa haatanse aynu wada-dhegaysanno qasaa'id ay inoogu luuqeeyaan culimo masiixiyiin ah.

**SONG: REEL—CUT----**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin